



## Foomka Heshiiska Daynta Tiknoolajiyada

Dugsiyada Edina Public School Degmada 273 (ISD 273) waxay la galayaan heshiiskan:

\_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_  
(Ardeyga) (Waalidka)

Barnaamijka qalabka daynta waxa loogu talagalay in lagu horumariyo guusha ardeyga iyadoo la balaadhinayo oo kor loo qaadaayo isticmaalka tiknoolajiyada, awoodaha wada-shaqeynta, iyo hal-abuurka ardeyda waxbarashadooda.

### Sharaxaada Hanitda Daynta\*

ISD 273 waxay siin doontaa ardeyga:

1. Hal (1) Qalab Waxbarasho
2. Aaladaha Haboon (tusaale: Xarig-jaarjar)

\*Muddada Heshiiskan, "qalabka" waxa loo fahmayaa inay ku jiraan dhammaan alaabaha lagu sheegay "hantida daynta."

### Shuruudaha Heshiiska

Heshiiskani wuxuu bilaabmayaa \_\_\_\_\_  
(Taariikhda Maanta)

oo wuxuu dhammaanayaa marka laga noqdo \_\_\_\_\_ ee ISD 273.  
(Ardeyda)

### ISD 273 Waxay aqbalaysaa inay

1. Siiso qalab si fiican u shaqeynaya marka la keeno.
2. Baadho cilladaha farsamo soona jeediso siyaabaha loo dayici karo. Tani waxa ku jira aanse lagu koobin: dibu-dejinta sawirka koombiyuutarka, baddelida qalabka iyo/ama bixinta qiyaas dayactir haadhweerka xumaada.

### Macluumaad Dheeraada

- Jajabka qalabka iyo dayactirka waxa ka dhalan kara khasaare isticmaalka qalabka ah.
- Ardeydu waxay isticmaali doonaan fooldaradooda iyo macluumaadkooda markay galaan qalabka.
- Markuu ku dhaco khasaare ama waxyeelo qalabka noockasta ha noqdaane, ISD 273 waxay, xoriyadeeda, ku go'aamin doontaa kharashka iyo waajibaadka qoyska ee la xidhiidha wixii waxyeelo soo gaadha koombiyuutarka.
- ISD 273 waxay go'aamin doontaa in waxyeelada ay keentay dayacaad taasoo burinaysa heshiiskan.
- Iibsashada dhar gacmo dhaadheer leh oo difaaca qalabku **aad baa loo dhiirigalinayaa** si loo yareeyo waxyeelada.

### Qoyska iyo Areygu Waxay Ogolaadeen inay:

1. Ka ilaaliyaan qalabka waraaqaha, qoraalka, farshaxanka, qorista, iwm.
2. Ka dhigaan dhammaan foomamka aqoonsiga lama taabtaan. Lagama saari karo tirada siriyalka, baarkoodhka, iwm.

3. U adeegsadaan qalabka qaab taxadir leh oo haboon, oo ka masuul noqdaan khasaaraha ama waxyeelada qalabka. Qaadaan masuuliyada kormeerida isticmaalka ardeyga ee qalabka marka guriga, iyadoo raacaya tilmaamaha Siyaasada Icticmaalka la Ogot Yahay ee ISD 273 iyo Xeerka Anshaxa Onlaaynka Ardeyga. Qoysku wuxuu ogolaaday inuu u hogaansamo oo waafaqo dhammaan shuruucda dalka, gobolka, deegaanka iyo sharciyada kale, amarrada iyo qawaaniinta lahaanshaha, isticmaalka, ama ilaalinta qalabka.
4. Kusoo celiyaan qalabka xarunta warbaahinta dugsiga ama ku iibsadaan qalabka qiimaha suuqa sida uu dhigayo ISD 273 dhammaadka sanad dugsiyeedka ama haddii ardeygu ka tago degmada.
5. Qalabku waa, oo markasta wuxuu ahaan doonaa, hantida kaliya ee u gaara ISD 273. Qoysku uma yeelan doono xaq, mansab, ama dan, marka laga reebo sida lagu sharxay Heshiiskan.
6. Ka qeybqaataan dhammaan nidaamyada qiimeynta qoraalka iyo hadalka ah.
7. La xidhiidhaan Xarunta Warbaahinta dugsiga marka dhibaato ka timaado qalabka.
8. Qoysku uma qabsan doono dhibaato ISD 273 iyo wakaaladihiisa wixii iyo dammaan cabashooyinka, talaabooyinka, dacwadaha, dhageysiyada, kharashaadka, lacagaha-ku baxa, waxyeelooyinka ama masuuliyadaha, oo ay ku jiraan lacagta xeer-ilaaliyaha iyo kharashaadka kasoo baxa, la xidhiidha ama ka dhalanaya qalabka, isticmaalka qalabka, ama Heshiiskan, oo ay ku jiraan, iyadoon xadidnayn, soosaarka, keenista, lahaanshaha isticmaalka, shaqeynta, ama soo-celinta qalabka.
9. **Aqbal inaad bixisid dhammaan kharashaadka dayactirka.**
  - a. Shaashada waxyeeloday ama jabtay kharashkeedu wuxuu noqon karaa \$30.
  - b. Kharashka badellista jaarjarka la bixiyey waa \$30
  - c. Khasaaraha qurxinta oo ay ku jiraan waraaqo, daabacada, calaamadinta waa \$30
  - d. Kasaarida aqoonsiyada degmada: lambarka siiriyaalka ama baarkoodhka degmadu waa \$30
  - e. Kharashka badellista ee qalabka oo dhan waa ilaa \$400.

## Heshiisyo Dheeriya

Qoysku wuxuu fahmay in jabinta shuruudahan sare ay ka dhalan doonto ka saarida koombiyutarka ardayga.

Ciwaanka Qoyska

Magaalada

Furaha Goobta

Lambarka Tilifoonka

## Saxeexyada

Magaca Ardeyga \_\_\_\_\_ Aqoonsiga Ardeyga \_\_\_\_\_ Taariikhda \_\_\_\_\_

Waalidka ama Masuulka (loogu talagalay QOYSKA) \_\_\_\_\_ Taariikhda \_\_\_\_\_

Lambarka Qalabka \_\_\_\_\_